

Ogolaanshaha Jeega Elektarooniga

Good To Go! Xeerarka iyo Sharuudaha

XEERARKAAN IYO SHARUUDAHAN DHEERAADKA AH EE ACH, WADAJIRKA UU WEHLIYO XEERARKA IYO SHARUUDAHA KOOWAAD EE ARJIGAAGA, WAXAY KA KOOBANYIHIIN WAAXDA GAADIIDKA GOBOLKA WASHINGTON ("WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF TRANSPORTATION, WSDOT") GOOD TO GO! HESHIISKA MACMIILKA MACMIILKA ("HESHIISKA") LA GAARAY OO AY GALEEN IYO U DHAXEYMO ("MACMIILKA") IYO WSDOT *GOOD TO GO!* XARUNTA ADEEGA MACMIILKA ("XARUNTA ADEEGA MACMIILKA").

Taabashada "waan aqbalay", waad qirsantahay inaad aqrisay oo aad ogolaatay koowaadka Good To Go! Xeerarka iyo Sharuudaha iyo Jeega Elektarooniga ah (ACH) Xeerarka iyo Sharuudaha hoos ku qoran. Waad fahamsantahay in cad ku jiro kala duwanaanshaha aad qeexday ayaa si joogta ah looga jarayaa koontada bangigaaga oo lacag bixinta akoonka *Good To Go!* .

Waa inaad riixdaa "waa aqbalay (I agree)" ka hor inta aan laga aqbalin buuxinada jeega elektarooniga ah koontadada Good To Go! .

Haddii tan ay tahay lacag bixin hal ah, ansixintaan waxay u shaqeyneysaa wareejintaan kaliya. Haddii tan ay tahay lacag bixin soo noqnoqoneysa oo buuxinta tooska ah, ansixintaan ayaa sii jireysa illaa aad soo ogeysiiso xaruntaada adeega macmiilka *Good To Go!* joojinteeda adoo baajinayo lacag bixino walboo la sugayo iyo tilmaamaha lacag bixinta soo noqnoqoneysa ee ku jirto nidaamka ugu yaraan todoba (7) maalmood shaqo ka hor inta akoonkaaga loo jadwaleynin in laga jaro.

Xeerarka iyo Sharuudaha Jeega Elektarooniga (ACH)

1. Wixii lacag bixinta halka jeer ah, waxaad aqbashay inaad u fulliso lacag bixinta elektaroonig ahaan oo waxaad u ansixisay Good To Go! inay elektaroonig ahaan uga jaraan koontadaada bangiga aad siisay.
2. Lacag bixinta halka jeer ah, ansixintaada waxay u shaqeyneysaa hal wareejin kaliya.
3. Wixii buuxinta tooska ah, ansixintaada waxay sii jireysaa illaa aad soo ogeysiiso adeega macmiilka Good To Go! joojinteeda adoo baajinayo lacag bixino walboo la sugayo iyo tilmaamaha lacag bixinta soo noqnoqoneysa ee ku jirto nidaamka ugu yaraan todoba (7) maalmood shaqo ka hor inta akoonkaaga loo jadwaleynin in laga jaro.
4. Wixii buuxinta tooska ah, waa inaad doorataa kala duwanaanshaha cadadka deynta jeega elektarooniga ah. Kala duwanaanshaha waa inuu ku bilowdaa si aan ka hooseynin \$30.00 (oo doolarada oo dhan).
5. Si aad uga qeybqaadatid buuxinta jeega elektarooniga ah, waxaad aqbashay lacag bixinta tooska ah ee akoonka bangigaaga ee ku jirto kala duwanaanshaha lacag bixinta la xushay. Good To Go! uma suurtoogleysa inay ku soo ogeysiiso cadadka lacag bixinta saxda ah xili hore. *Good To Go!* kuma soo ogeysiineysa haddii cadadka lacag bixinta ay ka duwantahay lacag bixintii ugu dambeysay ee aad ku sameysay jeega elektarooniga ee koontadada *Good To Go!* .
6. Cadadka lacag bixinta tooska ah ma gaareysa qiyaamka doolarka ugu sareeyo ee kala duwanaanshaha lacag bixinta la doortay.
7. Wixii buuxinta tooska ah, sharuudaha haraaga koontada waxaa la qiimeynayaa bil walba oo maalmaha la xushay. Lacag bixinada tooska waxaa loo habeynayaa koontooyinka aanan buuxin sharuudaha haraaga (sida maalmaha la doortay) ee maalinta ganacsiga xigta. Haddii taariiqda buuxinta ku dhacdo fasax ama taariiqo kale markii machadyada maaliyada ay xiranyihiin, lacag bixinta waxaa laga jarayaa maalinta ganacsiga xigta.
8. Wixii buuxinta tooska ah, macaamiisha way baajin karaan buuxinta jeegooda elektarooniga tooska ah iyadoo lala xiriirayo adeega macmiilka Good To Go!. Joojinta waxay qadan kartaa illaa todoba (7) maalin ganacsi ah. Adeega macmiilka waxaa lagala soo xiriiri karaa www.MyGoodToGo.com ama adoo soo wacayo 1-866-936-8246.
9. Warbixinta diritaanka lacagta iyo lacag bixinta waxaa laga helaa xili walba onlaynka www.MyGoodToGo.com.
10. Lacag celinada waxaa la helayaa marki la xiro koontadaada kadib markii dhammaan lacag bixinadaada jidka iyo qidmooyinka la bixiyo, oo waxaa lagu sameynayaa koontadaada bangiga elektarooniga ah. Haddii lacag celin aan lagu sameyn karin koontadada, sheeg (jeega) damaanada la soo saarayo.

FADLAN U DAABACO NUQULKA OGOLAANSHAHAN SI AAD UGU DARTO DIIWAANADAADA

Sharciga VI ee Ogeysiiska Dadwaynaha Siyaasada Waaxda Gaadiidka Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation's, WSDOT) ayaa dhigaysa inaan qofna, ayadoo la eegaayo qowmiyadda, midabkiisa, dalka uu kasoo jeedo, ama jinsiga uu yahay, sida ku xusan Sharciga VI ee Xaquuqa Dadwaynaha ee soo baxay 1964, inaan laga reebin ka qayb galka, loona diidin gunnooyinka, ama inaan lagula kicin wax takoor ah oo ka dhan ah barnaamijka iyo hawlaha federaalka maalgeliyo. Qof kasta oo aaminsan in xaquuqiisa Sharciga VI lagu tuntay, wuxuu cabasho usoo gudbin karaa Xafiiska Fursadaha Sinnaanta (Office of Equal Opportunity, OEO) ee WSDOT. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka loo gudbiyo cabashada Sharciga VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibadyada takoor la'aanta, fadlan kala xiriiri Iskuduwaha Sharciga VI ee OEO adoo kala xariiraya (360) 705-7082.

Xogta Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) Xogtaan oo qaab kale u qoran ayaa la heli karaa kadib marka iimayl loo diro kooxda Kaladuwanaanshaha/Arrimah ADA ayadoo lagala xariirayo wsdotada@wsdot.wa.gov ama laga wacaayo lambarka bilaashka ah ee 855-362-4ADA (4232). Shaqsiyaadka dhagoolayaasha ah ama maqalku ku adag yahay waxay sameyn karaan codsi ayagoo wacaaya Washington State Relay oo ah 711.